

# Hagaha Tixraaca Kuurooyinka Xoojiya Tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay Dhammaan Da' Kasta



Adiga ama canugaada waxaad isku tallaasheen tallaalka taxanaha aasaasiga ah ee COVID-19 si naftaada iyo nafta dadka kaleba aad ooga ilaalisid inuu soo gaaro xanuun daran, isbitaal dhigid, ama xitaa dhimasho ka timaada COVID-19. Daraasaduhu waxay muujiyeen in iyadoo tallaalada COVID-19 ay waxtar sii leeyihiin, in lala xiriiriyey hoos udhac kuyimaada difaacooda muddo kadib.

***Hadda, qaadashada xoojiyaha tallaalka ayaa ah habka ugu waxtarka badan ee lagu sii wadi karo difaacaan.***

Jaantuuskaan hoose ka hubi si aad u eegto haddii adiga ama canugaada aad uqalantaan hal ama in kabadan oo qaadashada kuurooyinka xoojiya tallaalka COVID-19 ah.\*

	Yaa uqalma?	Goormee ayaan qaadanayaa xoojiyaha tallaalka?	Ma qaadan karaa xoojiyaha tallaalka oo labaad?	Waa xoojiyehee?
<p><i>Haddii aad qaadatay tallaalka...</i></p> <p><b>Pfizer</b></p>	<p>Qofkasta oo <b>5+</b> sano jir ah waa inay qaataan kuuradooda xoojinta tallaalka ah si ay ula socdaan wixi udambeeyey.</p>	<p>Ugu yaraan <b>5 billood</b> kadib markii la dhammeystiro wareegyada taxanaha aasaasiga ah ee tallaalka Pfizer.</p>	<p>Qofkasta oo jira da'da 50+ sano waa inuu qaataa xoojiyaha tallaalka ee 2aad ugu yaraan <b>4 billood</b> kadib qaadashada xoojiyaha tallaalka ee 1aad.</p>	<p><b>Dadka waaweyn ee jira 18+ sano</b> waxay qaadan karaan kuurada xoojiye kasta oo tallaalka mRNA COVID-19 ah.</p> <p><b>Caruurta da'doodu udhaxeyso 5-17 sano</b> waa inay qaataan xoojiyaha tallaalka Pfizer.</p>
<p><i>Haddii aad qaadatay tallaalka...</i></p> <p><b>Moderna</b></p>	<p>Dadka waaweyn oo <b>18+</b> sano jirka ah waa inay qaataan kuuradooda xoojinta tallaalka ah si ay ula socdaan wixi udambeeyey.</p>	<p>Ugu yaraan <b>5 billood</b> kadib markii la dhammeystiro wareegyada taxanaha aasaasiga ah ee tallaalka Moderna.</p>	<p>Qofkasta oo jira da'da 50+ sano waa inuu qaataa xoojiyaha tallaalka ee 2aad ugu yaraan <b>4 billood</b> kadib qaadashada xoojiyaha tallaalka ee 1aad.</p>	<p>Kuurada xoojiye kasta oo tallaalka mRNA COVID-19 ah.</p>
<p><i>Haddii aad qaadatay tallaalka...</i></p> <p><b>Johnson &amp; Johnson</b></p>	<p>Dadka waaweyn oo <b>18+</b> sano jirka ah waa inay qaataan kuuradooda xoojinta tallaalka ah si ay ula socdaan wixi udambeeyey.</p>	<p>Ugu yaraan <b>2 billood</b> kadib markii la dhammeystiro wareegyada taxanaha aasaasiga ah ee tallaalka J&amp;J.</p>	<p>Qofkasta oo jira da'da 50+ sano iyo kuwa tallaalkooda aasaasiga ah uqaatay tallaalka J&amp;J iyo kuurada xoojinta ah qofkaas waa inuu qaataa xoojiyaha tallaalka ee 2aad ugu yaraan <b>4 billood</b> kadib qaadashada xoojiyaha tallaalka ee 1aad.</p>	<p>Kuurada xoojiye kasta oo tallaalka mRNA COVID-19 ah ayaa J&amp;J lagaga doorbidaa kuurada xoojinta ee 1aad. Xoojiyaha 2aad waa inuu noqdaa tallaalka kasta oo mRNA COVID-19 ah.</p>
<p><i>Haddii aad qaadatay ...</i></p> <p><b>Novavax</b></p>	<p>Haddii aad qaadatay Novavax oo ah taxanihii koowaad, waqti xaadirkaan uma qalantid inaad qaadato cirbad talaal xoojiso ah nooc kasta oo ay tahayba.</p>			
<p><b><i>Haddii difaacaga jirku u liito si heer dhexe ama heer daran ah, tilmaamaha lagu siinaayo waa ay kaladuwanaa doonaan.</i></b></p>				

\*Dadki uu dhawaan kudhacay caabuqa SARS-CoV-2 waxay tixgelin karaan **inay dib u dhigaan qaadashada kuurada xoojinta tallaalka COVID-19 ee koowaad ama labaad muddo 3 billood ah oo laga bilaabaayo marki uu ku bilowday ama laga helay caabuqa (haddii caabuqu ahaa mid aanan astaamo lahayn). Daraasaduhu waxay muujiyeen** (Ingiriis Kaliya) in waqtiga udhexeeya caabuqa iyo tallaalka oo kordha ay kadhalaan karto inuu kordho ka jawaabista difaacada jirka ee tallaalka. Sidoo kale, halis yar oo ah inuu caabuqu dib ugu soo laabto ayaa la arkay toddobaadyada ilaa bilaha kadambeyna caabuqa. Arrimaha gaarka ah sida halista **xanuunka daran ee COVID-19** (Ingiriis Kaliya), **heerka COVID-19 ee bulshada** (Ingiriis Kaliya), ama calaamadaha muujinaya inay jiraan caabuqa SARS-CoV-2 oo tiro badan waa in xisaabta lagu darsadaa marki la go'aansanaayo in dib loo dhigo iyo inkale qaadashada kuurada xoojinta tallaalka kadib caabuqa.

# Su'aalaha Sida Joogtada ah La Isku Weydiiyo ee Kusaabsan Kuurooyinka Xoojiya Tallaalka COVID-19

## Maxay tahay sababta kuurooyinka xoojinta ay muhiim u yihiin?

Kuurooyinka xoojiya tallaalka waxay gacan kageystaan difaac joogto ah oo kadhan ah xanuunka daran. Kuurooyinka xoojiya tallaalka ayaa markii hore lagula talinayey kaliya dadka halista sare ugu jira COVID-19 ka daran, laakiin talo soojeedintii waa la ballaariyey si loogu daro qof kasta oo jira 5 sano iyo kasii wayn oo qaatay tallaalka taxanaha ah ee Pfizer si ay gacan uga geystaan kordhinta ka hortagga ka dhanka ah xannuunka COVID-19. Dadka qaarkood, sida kuwa difaaca jirkoodu uliito si dhexdhexaad ah ilaa si aad u daran, waxaa laga yaabaa inay ubaahdaan kuurooyin dheeraad ah si ay u kordhiyaan difaaca jirka. Arrintaan si gaar ah ayey muhiim ugu tahay sare ukaca noocyada faafa iyo kiisaska COVID-19 ee kusii kordhaya Mareykanka oo dhan.

## Haddii kuurooyinka xoojiya tallaalka loo baahdo, taasi miyay ka dhigan tahay in tallaallada aysan shaqayneynin?

Maya. Tallaalada COVID-19 ee hadda aan ku hayno gudaha Mareykanka waxay si wanaagsan ugu shaqaynayaan sidii ay uga hortagi lahaayeen xanuunka daran, isbitaal dhigista, iyo dhimashada, xitaa ka dhanka ah noocyada caabuqa. Si kastaba ha noqotee, khubarada caafimaadka dadweynaha waxay arkayaan difaaca ka dhanka ah xannunada fudud iyo dhex-dhexaadka ah ee COVID-19 oo yaraaday, gaar ahaan dadyowga khatarta sare ugu jira dhexdooda.

## Maxaan usoo qaataa ballanta xoojinta tallaalka?

[Fadlan kaarkaaga/kaarka ilmahaada ee tallaalka](#) usoo qaado ballanta qaadashada xoojinta tallaalka si bixiyaha xoojinta tallaalka uu marka hore u hubiyo in taxanihi wareegii koowaad ee tallaalka lasoo dhammeystiray. Haddii uu lumay kaarka, bixiyaha wuxuu ka fiirin karaa diiwaankaaga.

## Waa maxay farqiga u dhexeeya kuurada tallaalka ee dheeraadka ah iyo kuurada xoojiso tallaalka?

Kuurada tallaalka ee dheeraadka ah waxaa loogu talagalay bukaanada difaaca jirkoodu liito oo soo dhameystay wareega taxanaha tallaalka mRNA oo 2-kuuro ah (Pfizer ama Moderna) laakiin aan lahayn jawaab celin difaac ku filan oo xooggan.

Kuurada xoojiso tallaalka waxaa loo qaataa inay kor uqaado ama dib usoo celiso ilaalinta iyo/ama difaaca jirka kadib marka difaaca wareegyadii hore ee tallaalka ay yaraadeen muddo kadib.

## Magaca tallaalka miyuu muhiim u yahay qaadashada kuurada xoojisa tallaalka?

Waxaad kuurada xoojinta uqaadan kartaa tallaalka ka duwan kii aad qaadatay wareegyadii taxanaha aasaasiga ahaa. Haddii aad jirto 18 sano ama aad ka wayn tahay oo aad qaadatay Johnson & Johnson ama labo kuuro oo ah tallaalka mRNA ayna ahayd taxanahaaga tallaalka ee koowaad. Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada) waxay sameeyeen go'aankooda kadib markii ay si taxadar leh dib u eegis ugu sameeyeen xogtii ugu dambeysay ee (Moderna, Johnson & Johnson, xoojiyeyaasha isku qaska iyo isku aadinta), iyo dood adag oo wadatashi leh oo ku saabsan tallaalkada xoojinta. Waqti xaadirkaan Novavax ma lahan wax cirbad tallaalka lagu xoojiyo oo lagu taliyo in lala qaato waana inaan lagu dari ama lala barbardhigin tallaalkada kale ee COVID-19. **Dadka jira 17 sano iyo kasii yar waxaa laga yaabaa inay kuurada xoojinta kaliya u qaataan tallaalka Pfizer haddii ay qaateen taxanaha tallaalka Pfizer.**

## Goorma ayaa loo arkaa inuu qofku si buuxdo u tallaalan yahay?

Adiga ama ilmahaada waxaad **si buuxda u tallaalan tihiin** labo toddobaad kadib qaadashada dhammaan kuurooyinka taxanaha aasaasiga ah ee lagu taliyey ee tallaalka caabuqa COVID-19.

Adiga ama ilmahaada waxaad **si dhammeystiran ula socotaan** tallaalka COVID-19 marki dhammaan kuurooyinka taxanaha aasaasiga ah iyo [kuurooyinka xoojiya tallaalka ee lagu taliyey](#) (Ingiriis kaliya) aad qaadateen, marki aad uqalantaan.

## Kuurooyinka xoojiya tallaalka miyaa lala qaadan karaa tallaalkada kale, sida tallaalka hergabka?

Haa. Adiga ama ilmahaada waxaad qaadan kartaan tallaalka COVID-19 adinkoo isla mar ahaantaana qaadanaya tallaalkada kale. Uma baahnid inaad cunugaaga uqabato ballanta [tallaalkada laga rabo iskuulka \(Ingiriis Kaliya\)](#) ama tallaalkada kale ee lagu taliyey si gooni ka ah ballanta tallaalka COVID-19. Ballanta tallaalka COVID-19 waa fursad kale oo adiga ama cunugaaga aad ku heleysaan dhammaan tallaalkada lagu taliyey.

**Miyaad qabtaa su'aalo dheeraad ah? Booqo:**  
[doh.wa.gov/covidbooster](https://doh.wa.gov/covidbooster)